Su,aalaha caadiga ah ee soogalootiga cusub

Gudiga latalinta kala duwanaansha dhaqanka ee Booliska Firidirikton waxaa la aas aasey 2007, dii sida barta rasmiga ah ee laga xiriiro oo u dhexeyso Booliiska iyo wakiilada ee ka jira bulshadeena kale duwan ee sii siyaadeysa. Waxaana Gudoomiye ka ah taliye ku xigeenka booliska. Ahaana sarkaal bileyska xiriiriyaha dhaqamada kalla duwan ka go,an sidoo kale xitaa wuxuu magacaabey gudiga si ay u bixiyaan dadaalo wacyi gelineed gaar ah ayagoo matelaya ciidanka Booliska ee Firidirkton.

U jeedada ciidanka Booliska Firidirikton waa “bedbaadin iyo illaalin” taasoo ay u siman yihiin dhamaan muwaadiniinteena si isku mid ah iyo ayada oo maanka lagu hayo in aan bixineyno illaalin xirfadeysan oo bulshada dhexdeeda ah.

Inta lagu guda jiro kullanka gudiga dhaqamada kalla duwan oo wadaagaya akhbaarta illaalinta dadka ku cusub wadanka waa laga hadlayaa. Waxaa la isla soo qaadey in dad badan oo wadanka ku cusub ay qabaan su,aalo la mid ah ama noocaan ah. Tani xitaa waxaa la wargeliyey CBF (Ciidanka Booliska Firidirikton) marka loo soo jeedinayo dadka wadanka ku cusub ayadoo markaas loo marinayo Ururka Dhaqamada kalla duwan ee Firidirikton fasalada Ingiriisiga. Sananadii ugu danbeeyey dadka ku cusub wadanka waxaa laga diiwaan geliyey fasalo Ingiriisi ah waxaa ay heleena “Isbarasho ku saabsan Booliska Canada” soo jeedinta CBF. Tani waxaa ay sii saa akhbaar guud oo ka timaada Booliska laakiin waxaa ka sii muhiimsan in ay u ogolaaneyso is-dhexgalka lalal yeesho sarkaal boolis ah uuna awoodo in uu si shaqsi ah kaaga jawaabo su,aalahaada xitaa waxaa la ogaadey su,aalaha noocaan ah in si joogto ah loo weydiiyo.

CDAC waxaa looga Hadley liiska su,aalaha soo noqnoqda ee la isweydiiyo in la abuuri karo laguna dhejin karo khadka tooska ah si uu qof kasta uu u awoodo. Waxaa la cadeeyey in aan dhamaan dadka ku cusub wadanka aysan Ururka Dhaqamada badan aanan hoos tagin aysan ka faa,ideysana soo jeedinta. Ayadoo wadashaqeyn lala wadaago xubnaha CDAC sedexda su,aalood ee ugu horeeya waxaa loo abuurey ayadoo lala qaba hadafka ah in ayaga lagu ballariyo mustaqbalka. Faransiiska iyo Ingiriisiga waxaa dheer, ayadoo lala qabo taageerada Ururka Dhaqamadan Badan ama kalla Duwan, su,aaluhu xitaa waxaa lagu turjumey Arabik, Soomaali iyo Mandarin. Luuqadahan waxaa doortey Ururka Dhaqamada Badan ama kalla Duwan in ay yihiin luuqadaha ugu sareeya ee lawadaago ayna ku hadlaan dadka ku cusub wadanka taasoo ku saleysan wadanka ay ka imaadeen.

Su,aalahan iyo jawaabahan waxaa laga heli karaa bogayaga ee khadka www.fredericton.ca/en/fredericton-police. Ayadoo la ogyahay in dadka ku cusub wadan laga yaabo in aysan raadinin Boga khadka ciidanka Booliska ee Firidirikton, xiriiro ayaa xitaa lagu dhejiyey boga ama bararaha bulshada taasoo u adeegta bulshada wadanka ku cusub, sida laanta socdaalka ee Firidirikton www.immigrationfredericton.com Ururka Dhaqamada Badan ee Firirdirikton www.mcaf.nb.ca

Su, aalaha caadiga ah/guud ee ka yimaada dadka cusub

Waa maxay weerar ama u gefid?

Weerarida waa sameyn ama isku dey oo lagu sameeyo qof kale ogolaansho la, aantiisa. Waxey isugu jirtaa garaacis, feerid, laadid, dharbaaxsho, tuuryeyn, ku candhuufid qof kale i.w.m. qofna uma gefi karo ama ma weerari karo qof kale.

Weerar ama gef galmo waa nooc ama qeyb isugu jirta galmo aan la rabin oo qeyb kasta leh, tusaale shumis, taabasho, galmo, iwm. Waa xoog ku dirqin qof kale ogolaansho la, aan u jeedaduna ay tahay galmo.

Qeexitaanka heerka denbi ee weerarka ama gefka:

265 (1) qofka gefbuu geestey marka:

- (a) uu ogolaansho la, aanta qofka kale, uu si qasab ah oo ula kac ah ugu dirqiyo qofka kale, si toosan ama dadban;
- (b) uu isku deyo ama uu u hanjabo, ficil ama jeedaalo, si uu qof kale ugu dirqiyo, hadii uu, ama ay sababeyso in uu qofka kale uu rumeysto sababo gundhig ah uu heysto, awooda xaadirka ah uu ku saameynayo u jeedadiisa; ama
- (c) marka uu si furan uu u xirto ama uu u sito hub ama uu iska yeel yeelayo, wuxuu cadeynayaa ama uu xanibayaa qofka kale ama baryo.

Maxaan sameeyaa hadii aad ka mid noqdo isku dhac ama shil gaari?

Daraawalka ka mid noqda isku dhaca gaari la saran yahay kaasoo dhalliya dhaawac, dhimasho ama waxyeelo hanti waxaa waajib ah (125, 126, 127 ee Heerka Gawaarida(HG):

- Istaag goobta uu shilka ka dhacay

- Caawiimaad sii dhaawacyada

- Bixi magacaada, cinwaanka, aqoonsiga saxanka gaariga isla marka lagaa codsado akhbaarta aqoonsiga daraawalnimada.

Daraawalka ka kid noqda isku dhaca gaari aan lasaarneyn waxaa waajib ku ah (128 HG):

- Istaag goobta uu shilka ka dhacay

- Melee ogoysiina daraawalka/milkiilaha

- Bixi magacaada, cinwaanka, aqoonsiga saxanka gaari isla marka lagaa codsado akhbaarta aqoonsiga daraawalnimada.

- Hadii daraawalka ama milkiilaha aan la meleyn Karin, u dhaaf ogeysiis qoraal ah adigoo siinaya magaca iyo cinwaanka daraawalka milkiilaha iyo milkiilaha ku dhuftey gaariga iyo faafaahin wixii dhacay.

Daraawalka ka mid noqda shil ama isku dhac gaari ee hanti kale waxaa waajib ku ah (129 HG):

- Qaado tallaabooyin macquul ah si aad ugu meeleyso ogeysiina milkiilaha ama qofka wakiilka ka ah hantida.

- Bixi magacaada, cinwaanka, aqoonsiga saxanka gaari isla marka lagaa codsado akhbaarta aqoonsiga daraawalnimada

Intaa waxaa dheer masuuliyadaha sare ku xusan dhammaan kiisaska kuwaasoo isku dhaca dhalliyey dhaawac, dhimasho ama waxyeelo ka badan $1000 daraawalka waxaa waajib ku ah (130 (1) HG):

- Sida ugu dhaqsiyaha badan ama ugu deg degsiimada badan ogeysii adigoo la xiriirayo booliska deegaanka

Qeybaha falalka la xiriiri gaadiidka ama baabuurta : s. 125, 126, 127, 128, 129, 130(1)http://laws.gnb.ca/en/ShowPdf/cs/M-17.pdf

Maxaan ka fishaa booliska inta lagu guda jiro xiliga ay ii joojiyaan arimo laxiriira taraafikada?

Marka gaari boolis/amerjensi uu hawlgalayo ayna u shidan yihiin leerarka iyo dhawaaqa daraawaliintu waa in ay wadada midig oga leexdaan ayna si deg degsiimo ah u wadada oga degaan una joojiyaan ayna sii taagnaadaan illaa gawaaridaas ay ka gudbaan ama uu si toos ah boolisku u hago (168(1) HG)

Inta lagu guda jiro istaagista taraafikada waa in aad ku dhex jirtaa gaarigaada- HA KA bixin, sargaalka booliska ayaa kuu imaanaya. Gacmahaada ku hay meel uu sargaalka booliska uu ka arki karo. Tani waa bed baadada qof kasta.

Sargaalka booliska wuxuu:

- Kuu sheegi doonaa sababta laguu joojiyey

- Wuxuu ku weydiin doonaa aqoonsiga daraawilnimada, diiwan gelinta iyo cadeynta caymiska - waxaa waajib kugu ah in aad siiso dukumintiyadaa ama aqoonsiyadaas. U sheeg halka ay ku jiraan ama aad gelisey inta aadan laacin.

- Waxey warqadahaada kulla noqon doonaan gaarigooda booliska- ee ku ekow gaarigaada

- Waxey ku soo noqon doonaan gaarigaada ayagoo sida waraaqahaadi oo ku qoran ganaax/warqad digniin ah ayadoo markaas loo eegayo denbiga

Boolisku MA QAADAAN ganaaxa ama lacag inta lagu guda jiro istaagnaanta taraafikada. Ganaaxyada lama siin karo saraakiisha. Sharaxaadyada ku saabsan halkaad ku bixineyso waxey ku qoran yihiin ganaaxa/warqada laguu gooyey.